



Xulashada iskuulka 2021 – waxaa la joogaa waqtigii aad ilmahaaga aad u codsan lahayd iskuulka!

Markay tahay deyrta 2021, waxaa la joogaa xilligii la bilaabi lahaa dugsiga.

Inta u dhaxeysa **11 Janaayo 2021 iyo 31 Janaayo 2021**, Waalidka degmeda Lund waa in uu ilmahiisa u codsadaa iskuul.

Arday ahaan iyo waalid ahaanba, waxaad xaq u leedahay xulashada iskuulka aad rabto. Taasi oo macneheedu ay tahay in aad codsan karto iskuulka aad rabto. Waxa uu noqon karaa skuul degmedu maamusho ama ama mid gaar ah oo madax bannaan. Iyada oo aan loo eegayn meesha iyo sida aad u degantahay ama sida ugu dhowdahay iskuulka, meesha aad ku nooshahay, waa in la soo gudbiyaa codsi si loo helo fursad si saameyn loogu yeesho meelaynta iskuulka.

Codso iskuulka adiga oo adeegsanaya habka elektaroonigga (e-tjänst)

Waxaad kusoo gudbinaysaa codsigaaga adoo adeegsanaya adeegga elektaroonigga ah ee degmada. Adeegga elektaroonigga ah wuxuu u baahan yahay in lagu soo galo aqoonsiga elektaroonigga (e-legitimation) / Aqoonsiga Bangiga (Bank ID). Haddii aadan awoodin in aad ku dalbato adeegga elektaroonigga, waxaa taas beddelkeeda lagu sameyn karaa foomkii loogu talagalay ee iskuulka xannaanada carruurta.

Waa inaad ku codsataa adoo adeegsanaya adeegga elektaroonigga **ugu yaraan** saddex iskuul adiga oo eegaya sida ay u kala mudan yihiin ama isku xigxigaan. Waad galin kartaa ama aad codsan kartaa iskuulada degmada iyo kuwa madaxa banaan ee gaarka loo leeyahay labadaba sida aad u rabto. **La soco fadlan in lagugu meelayn karo ama aad boos ka heli karto hal iskuul kaliya oo degmada ama iskuul madax-bannaan oo kaliya.**

Haddii ilmuhu leeyahay labo waalid/mas,uul waa in ay labaduba saxiixaan. Waalid ahaan waxa aad leedahay masuuliyad sharci oo ilmaha ah, waana inaad ku raacdaa rabitaanka waalidka kale. Haddii aad tahay qofka kaliya oo waalid ah, waxaa lagaa doonayaa hal saxiixa oo kliya.

Go'aan ayaa la sheegi doonaa bisha Maarso 2021

Marka ay muddada codsiga dhammaato kaddib, ayaa degmadu is waafajineysaa rabitaanka waalidiinta iyo boosaska laga heli karo iskuulka. In kabadan boqolkiiba 90 caadi ahaan waxa ay helaan iskuulka ay rabaan marka hore.

Haddaba Haddii aad ku soo gudbisay codsiyada adigoo adeegsanaya elektaroonigga, waxaad heli doontaa ogeysiin e-maylka ah kaas oo la cayimayo markii go'aanka la helayo. Haddii aad ku dalbatay foomka waxaad ku heli doontaa go'aankaaga boostada caadiga ah.

Faahfaahin dheeraad ah ka akhriso bogga lund.se/skolval

Wixii Faahfaahin intaas dheer oo ku saabsan xulashada iskuulka ka akhriso www.lund.se/skolval

Su'aalo ma qabtaa? La xiriiir maamulka iskuulka carruurta barnochskola@lund.se ama xarunta muwaaddiniinta ee degmada adoo kala xiriiraya lunds.kommun@lund.se.

Salaan

Maamulka iskuulka carruurta ee degmada Lund.